Johoraddii Geeska

Qalinkii: Cabdifataax Xasan Maxamed "Barawaani"

Ogos 02, 2019.

Goor fiid ah, cadceedduna kolkaas uun godka ku xarootey, falaadhaha cirka guduudka ka dhigeyna ay weli sii muuqdaan, laydh macaan oo aad mooddo sidii saxansaxo roob inta uu dhulka maasheeyey laamaha dhirta kolba dhan u ruxaysa. Shimbiraha saaka hiirtii waaberi kasoo hayaamey badda xeeligeeda ayaa hadda deegaanka korkiisa maraya, kuna luuqeynaya codad ashqaraarka dartii diihaalkii maanta ku illowsiinaya. Dabeecadda aan weli indhuhu hore u qaban baa dacal-ka-dacal isku xidhantey. Gashaantimaha iyo doobabka isu liishaamanaya ee gudcurka isu sugaya. Waxa lammaaneeyey fara ka ciyaarka dhoocilaha deegaankan bilicsan ee kolba gacanta ku dhufanaya horaaddo giigsan oo aan weli la jiidin, misena soo taagtaagan. Leydha fudud ee hablaha deegaanka adhaxda ka galeysa deedna garayska ka yara faydeysa; oo doobabku il qoodha ku xadayaan horaaddada midkood ee dhanka bidix ka muuqda. Duqeyda iyo waayeelka da'da ah misena awoodda iyo itaalka aan gabin, ee gadhka guduudsadey. Hooyooyinka badarka iyo buushaha kala haadinaya ee heesaha quudka quluubta isku madadaalinaya. Carraaba oo lagu naaneyso "Johoraddii Geeska Afrika" waa gabadh ka dhalatey boqortooyo uun tiro beelay u talisa, waa curadda boqor Baasaweyne. waxa ay ku jiiftaa leexo ku xidhan geed baxarasaaf ah oo qasrigooda ku dhexyaalla.

Carraaba oo isku luxeysa leexada hareerahana lagala taaganyahay khudaarta tiro beeshay ee kala jaadka ah waxa lammaaneeyey shaqaalaha aan tirada laheyn ee u heellan dharaar kasta, kob kasta iyo xilli kastaba. Mid u meydha, mid ufeedha, mid u saliideysa, mid u dalluugta jidhka, mid u heesta, mid u xinneysa, mid gasiinka u sameysa, mid milicda waxa ay ka hadhsan laheyd u sidda, mid hu'ga u meydha iyo mid u haggaajisa hu'ga iyo kumanaan kale oo midba shaqo gaar ah ay u heyso. Carraabo, waa gabadh timo dhaadheer oo jilicsan leh, timo aan madoobeyn aanan caseynna; isku dhex jir aad mooddo in xinnaha iyo sibaaqa lagu badhxey. Qoorteeda dhuuban ee dherer xigeenka ah, indhaheeda kibirka iyo jaceylku buuxiyey, sunniyaha qorqoran, sanka bagafsan ee haddana dhuubban ee waxoogaga yara dheer waxa u raaca dhabannada godan! Daamanka aan aadka u kuuskuusneyn haddana hilibku ku jiro ee khudaarta iyo gasiinka boqortooyadu nafaqeeyey.

Laabteeda la simman garbaheeda isku miisaaman, naasaha ibtoodu toostoosan tahay, soo taagtaagan ee isu dhow, haddana aan isku dhegneyn, raadinaya gacmo aad u dalliiga. Dhexdeeda madagta ah ee dhuuban, ee kolka ay ciyaareyso aad mooddo in aan lafba ku dhex jirin. Miskaha isasa sudhan ee aan aadka u waaweyneyn, haddana badhyaheeda ku kala fidsan. Kala jarnaanta jidhkeeda ee seddexda jaad ah ayaa indhuhu la ashqaraarayaan. Bowdyaha hilibka iyo barruurta isku dhafan ah ee luxmaya, dhaqdhaqaaya, socodka jiidaya, ee dhalaalaya, misena isku jaango'an ee aan kala socon ayaa cabbaar kolkii lagu luxey leexadii roob aan badneyn soo daatey. Shaqaalihii badankood waxa ay u carareen dhankaa iyo meel ay ka galaan roobka. Dhowrkii hareeraha ka fadhiyey ayey ku tidhi: "Iska taga idinkuna, keligey baan joogayaa

halkane". Gabdhihii waa ka wada tageen, keligeed ayaa geedkii leexadu saarneyd ku soo hadhey; oo aan uun kale wehelin.

Carraaba wixii dhibcaha roobku uga soo dusaanba geedkii ay ku leexaysaneysey waxa mar keliya bilaabmey roob mahiigaan ah, way ka naxdey hanqadhka iyo hillaaca dhacaya. Dabadeed way soo carartey, dhiiqadii bay ku dhex kuftey. Ax! Ax! Ax! Ruugga bidix ayaa murxadey, oo diirku ka qaadmey!! Way oydey! Illeen waa gashaanti aan weligeed inyarna soo gaadhine. Kuwo shaqaaliheedii kamid ah ayaa u soo ordey oo kiciyey, dabadeedna qasriga qolkay ka deganeyd geeyey. Waxa loogu qubeeyey si wanaagsan; ruuggii murxadeyna waa laga dhayey; oo dhir iyo daawo ayaa uu mariyey dhakhtar dhaqameedkii qasrigu. Carraaba hu' ay isku dedo ayaa loo keenay, gasiin diirranna waa loo soo sameeyey. Intii dab ay kulaasho oo qandhada iskaga biiso loogu maqnaa ayaa halmar waxa garabkeeda oo hu'gu ka yara dhacey ay dareentay gacan kulul oo naxariisi ka muuqato oo la saarey. Mar way naxdey oo waa ayyo ayey tidhi! Marna niyadda ayey ka laheyd: "Jannadan lagu saarey maxay ahayd?!"

Looma warcelin! Tolow waa ayyo? Ma shaqaalihiibaa? Ma doobabkii qasrigaa? Bal adba!! Johoraddii Carraaba waa ay naxdey, dabadeed waxa ay damacdey in ay soo jeedsato oo indhaheeda bal ay ku aragto waxan la saarey ee jannada lagu masaaleeyey. Mise cidba ma joogto; oo waa meel madhan! Cabsi iyo argagax ayaa kusoo degay Carraaba. Waa ayyo? Waa ayyo? Ayey dhowr jeer ku celcelisey balse nasiib xumo cidna uma warcelin! Dhidid badan baa kasoo yaacey Carraaba, kol dhaweydna dab ay kulaasho ayey sugeysey!! Kaaf iyo kala dheeri!! Gacmaha ayaa jareeyey oo gariirey! Bishimaha afka ayaa gariirey baqasho darteed. Lugaheedii dhulka ayey ku dhegeen, cid ka fujisa oo dhaqaaq tidhaa ayey ku reyn laheyd. In mowdkii hortaagan yahay ayaad moodeysaa! Wey dheygagtey, oo dhakafaartey, oo amakaagtey, oo anfariirtey, oo kala qabowdey, oo isku qabowdey! Durbadiiba, waxa usoo galey shaqaalaheedii mid kamid ah oo dabkii ay kulaali laheyd u sidda. Markay aragtey amiiraddii qasriga oo aan hadal kasoo baxeyn haddana aan dhaqaaq laheyn ayey billowdey in ay la hadasho, waaba loo warcelin waayey! Way kusoo dhawaatey; oo taabatey, kuna tidhi: "Marwo Carraaba, maxaa ku helay?" Yaa!! "Maxaa ku qalajiyey?" Way ruxdey.

Hal mar ayaa shooggii ku dhegay ka fuqey Johoraddii oo ay sidii qof hurdo kasoo kacey ku dhegtay shaqaalaheedi, oo ay tidhi: "Waxaan garaneyn baa garabka gacanta iga saarey oo gacan diirran lahaa, kolki dambena waan waayey" Muxuu ahaa? Ma adiga ayey aheyd tolow? May iyo mooji ayaa ay iskugu warceliyeen!! Johoraddii Carraaba waxa ay ku qancisey in ay is moodsiisey uune aysan wax u yimid oo gacan garabkeeda saarey jirin, isna dejiso, oo nasato. Balse Johoraddii Carraaba, taabashadaasi maankeeda waa ka bixi weydey habeenkii oo dhan. Mar waxa ay isweyddiisaa waxa uu ahaa, kol kale na waxa ay maankeeda ku wareerisaa sida fudud ee ay u weydey markii ay soo jeesatey! Kol kale na niyadda waxa ay ka tidhaa: "Allow yaa kugu soo celiya taabashadaasi garabka lagaa saarey ee aanad weligaa dareemin?!" Habeenkii sidii baa waagu ugu baryey Carraaba oo ay aroortiina uga kacdey furaashkii iyo xariirtii ay ku jiiftey!

Carraaba aroortii sidii caadada u aheyd baa ay ka toostey sariirteedii. Shaqaalaheedii tiro beelayna ay isasoo dul taageen si ay ugu shaqeeyaan. Kolkii ay shaqaalihii diyaariyeen amiirad Carraaba, waxa usoo galey aabbaheed Boqor Baasaweyne. Waxaana ay Carraaba u sheegtay dhacdadii xalay iyo gacantii la saarey ee ay weydey. Argagaxana iyo facajana ku abuurtey iyadoo sidii uga wewersan arrintaas waxase la yaab noqotey sababta ah Johoraddu weli usii hadal heyso

dhacdadaas. War tolow jinku uunka kale miyuu ka xasuus badan yahay? Mise cabsashada ayaa sababtey? Eebbe ayaa oge, boqorkii waxa uu amray in dhammaan shaqaalihii qasriga mid mid loo wareysto, ciidanna loo diro. Yar iyo weynba waa la baadhey in ay wax ka ogyihiin arrintaa oo in uun arkeen qof qasriga soo galey, oo qolka amiiradda galey ama kasoo baxayey. May iyo idinkaaba sheegaya ayaa ay ku wada warceliyeen! Wixii la baadho oo la raadiyaba la waa cid garaneysa, ama aragtey ciddaas mar la aragga ah ee argagaxa iyo cabsida ku abuurtey johorad geeska ee amiiradda Carraaba.

Sidaas ayaa dharaartii hore ku gebogabowdey oo loo waayey cid arrintaas uga ogaal badan Carraaba. La iskana dhaaf oo ismoodsiiskii jaariyadda lagu wada qanac iyo warkeedii xalay ay ku qancisey amiiradda. Boqorkiina waxa uu niyadda ugu dhisey Carraaba; in uu ilaalo xooggan u sameyn doono oo aysan dib dambe qolkeeda hortiisu cidlo u ahaan doonin. Dhammaan ammaanka qasrigana la xoojin doono dhinac kasta. Sidii ayeyna u dhacdey, oo ammaankii waa la adkeeyey, cid aan la garaneynna aagga qasriga iyo qolka amiiraddaba looma soo deyneyn. Goor ku beeggan duhurkii ay milicdu aadka u darneyd oo carraaba ay kasoo gashey hadhka daaradda hore ee qolkeeda barande yar oo ka horreeya, aadna u sharraxan ayaa ay ku yara nasatey, cabbaar ayaa ay joogtey halkaas. Sharaab iyo wixii ina boqor lagu yaqaanneyna loo keen oo ay isku qaboojisey. Waxayna shaqaalihii ka dalbatey in loo diyaariyo goobtii ay ku qubeysan laheyd, biyo kulul iyo kuwo qabow oo isku dhafan, hu' nadiif ah iwm. Markii loo diyaariyey ayaa doorkan waxa ay Carraaba damacdey in ay keligeed meydhato. Waxa ay u dooratey iyadaa oge, se waxa ay istidhi bal wixii xalay aad kelinnimada ku dareentay maanta aad aragtid! Shaqaalihiina haggaag iyo warsan marwo ayaa ay kaga tageen.

Carraaba qolkeedii ayey soo gashey, qeybtii qubeyska ayaa ay uga sii gudubtey, dharkiina waa ay iska kala fududeysey iyadoo hareeraha eegaysa!! Maxay ka eegaysaa tolow?! Bal adba!! Kolkii ay sidii lagu dhaley iska dhigtey ayaa ay dhex gashey biyihii meydhashada oo cadarkeedii, saabuuntii iyo wixii dhal boqortooyo lagu qurxin jirey oo dhan hareeraha ka yaallaan. Markay cabbaar is facastey oo kal iyo hoosba is xashey johoraddii. Ayaa waxa ay mar qur ah dareentay xanxantada lugo aad moddo in ay baadka qubeyska ku dhex jiraan sideeda oo kale kana soo horjeeda. Walow aysan arkeyn oo biyaha cad iyo xunbo ka sarreeyaan balse waxa ay dareentay xanxanteynta dareenka leh ee bowdyooyinkeeda iyo cajarradeeda taabanaya kolba. Sidii caadada u aheyd ayey judhiiiba naxdey oo ka booddey baadkii qubeyska! Balse doorkan ma aysan dheygagin ee si aamus leh ayey dhowr weedhood u tidhi: "Waa ayyo? Maxaad iga rabtaa? Kumaad aheyd?!!" looma se warcelin, sidii aan cidiba ku dhex jirin baadka. Cidhifka baadka ayaa ay qar badhideeda ah saartey oo biyihii aad u liseen gacantuna ka siibaneyso! Deedna gacanteeda ayey dhex gelisey baadkii qubeyska, sidii saabuun iyo fargal lumey oo kale ayey kolba dhinac u baadh baadhey in ay wax uun ku jiraan meesha. Nasiib xumo se, waa ay weyddey oo waxna ma aysan helin!!

Oo haddaa tolow muxuu ahaa wixii baadka ku xanxanteeyey?! Dee mooji!! Bal adba garo!! Malaa Carraabi waa ay waalantahay? Mise tolow ismoodsiis xadkiisa dhaafey ayaa hadheeyey maankeeda? Eebbaa nooga war roone! Carraaba biyihii qubyska ayaa ay ku noqotey, dabadeedna waa ay iska dhammeysatay meydhashadeedii. Kolkii ay kal iyo hoosba is nuurisey, oo dhalaalku ka boodayo ayaa ay kasoo baxdey baadkii. Deedan dhar xariir ah oo midabkoodu cas yahay ayaa ay isku juftey! Awal sowtii la odhan jirey casaanku waa midab jin. Adaaba sheegaya!! Malaa

iyadaaba Carraabi jin doon ah!! Carraaba, markii ay qadeysey ee casiir iyo hilib shimbireed isku cantuugtey ayaa ay isku tuurtey sariirteedii furaashka iyo xariirtu ku goglaneyd yadoo maryihii casaana gashan. Is tuurka ay dib isu tuurtey Carraabi, waxa bowdyooyinka iyo cajaraha ka feydantey xariirtii. Deedna jidh shilis oo dhalaalaya ayaa muuqdey!! Sidii ay uga fekereysey wixii baadka biyaha qubeyska dhexdooda ku xanxanteeyey ayaa haddana mar qur ah balaayadii aan la garaneyn wax ay aheydi gacan tii xalay oo kale la mid ah ilaa cajaraha u dalluugtey!! Carraaba lafteedu waa ay is illowdey iyadoo duuggitaanka macaansaneysa!! Lagaa raac!!!!

Mar qur ah ayaa Carraabi is tidhi taabo waxa ku dalluugaya? Tolow ma shaqaalihii baa?! Mayee ma aha ee waaba gacan lab ah!! Xaadda gacanta korkeeda ku taalla ayey ka dareentay in ay gacan lab tahay. Waa ay soo kacdey iyadoon qeylin oo anfariirin, misena aan dhakafaarin. Markiiba, waxa ay isheedu ku dhacdey wiil aan qasrigaba ragga jooga u ekeyn! Weligeed indhaheeda qof sidan oo kale may saarin! Waxa ay la noqotey cajab iyo amakaag!! Waxa ay niyadda iska weyddiisey, tolow ma nebi Yuusufkii Jinkaa, illeyn nebi Yuusufkii aadamuhu waa kii rawaxee!! Bal adba!! Kumaad tahay baa ay ku billowdey durbadiiba. Wiilkii waxa uu ugu warceliyey: “Marwo Carraaba, waan ogohay inaad tahay Johoraddii Geeska Afrika. Waxaana ahay amiirka boqortooyada Reer Axmar ee u talisa jinnka badankood, gaar ahaan kuwo bariga Afrika”. Wey dheygagtey Carraabi!! Mar shaydaanka ayey hoosta ka naartey, marna quruxda jinkan reer Axmar oo ay qisooyin ku maqashey kal hore ayey indhaha ku xadeysey!! Maxaad iga rabtaa iyo maxaad ii daba socotaa ayey ugu xejisey. Waxaa uuna durbadiiba ugu warceliyey: “ Boqortooyadeenna iyo tiinna ayaa jaar ah, balse nama aragtaan, annagaa se idin aragna. Waxaana aan kugu arkey geedka aad ku leexaysto, marar badan aaggayaga ayaad ugaadhsi u timid. Waanan ku caashaqey, ee maad isoo raaci?”

Carraaba oo lafteedu dhinacna ka anfariirsan lana yaaban jinkan damaaciyey, haddana iyadu damacdey ee niyadda iyo maanka kolba iska leedahay: “Naa maad raacdid, kani wax la sii daayo ma ahee!” Malaa carraaba sababta ay jinka u damacdeyba waa sheeko xariirooyin hore oo ay ku maqashey jin iyo insi is helay wax iskaga macaan ma jirto!! Niyaddeedana waa ka bixii weyddey salaaxiddii cajaraha, taabashadi xalay iyo xanxanteyntii bowdyaheeda ee duhurkii baadka qubeyska dhexdiisa aheyd!! Carraaba iyadoo weli aan u warcelin, maankana ka fikireysa, faryaradana ilkaha ku qaniinsan oo kolna baxeysa oo adduunyo kale u sawirmeyso kolna ay kal iyo hoos amiirka jinka ah kaga boganeysob ayaa waxa qolkii soo galey walaalkeed la dhashey oo lagu magacaabo Amiir Doolaal Boqor Baasaweyne. Durbadiiba jinkii muuqiisa waa ay weyddey Carraabi! Naxdin iyo cabsi baa samada kaga soo degtey oo dhidid kaga keentay, hadalkiina waa iskaga dhex yaacey “Walaal, walaal waan joogaa!! Waan maqli waayey yeedhmadiinna”. Amiir Doolaal laftiisu waa uu shakiyey oo sidii wax khaakhaayirsan buu qolka daba iyo dacal u fiiriyey!!!

Deedna, Carraaba waxa ayna dabo gashey walaalkeed iyadoo dhinacna ka khaakhaayirsan maankeedana ay weydiimo tiro beelay ku hardamayaan oo ay kamid yihiin: “Tolow miyaa la arki doonaa? Xagguu ka baxay? Miyuu duuley?” Haddana shaydaanka hoosta ka naareysa oo ka amakaagtey sida ilbidhiqsiga ah ee ay u weydey amiirkii reer Axmar! Doolaal iyo Carraaba oo wada socda waxa ay u galeen Boqor Baasaweyne oo kursigiisii boqortooyada isku kala waaxay. Mar keliya waxa ay Carraaba isha ku dhufatey weftiyo kala duwan oo reer Boqortooyo ah oo kobtii martida loogu talo galey fadhiya. Waxa ay marar badan intii ay dhex socotey roogga

guduudan ee qasriga garaadkeeda kusoo dhacayey weyddiimo kala jaadjaad ah, balse aanay mid kamid ah warcelin u heli weyddey. Wixii ay soo luudaanba, waxa ay soo hor istaageen aabbahood boqor Baasaweyne. Salaan kaddib, waa ay fadhiisteen. Kolkii ay sahalka la heleen kursigii xariirta iyo buushka ku sharraxnaa ee amiirradda loogu talo galey ayaa boqor Baasaweyne bilaabey ujeedka weftigan u joogo qasriga maanta. Waxa uuna ku yidhi Carraaba: "Aabbo, waxa maanta inna soo martiyey boqortooyadii ina adeerkay boqor Geesaweyne. Waxa aynna si milgo iyo sharaf ku dheehantahay iiga codsadeen in aan ku siiyo sidaasna laguugu daro amiirka uu dhalay ina adeerkay ee Warfaa Boqor Geesaweyne."

Wuxuuna Boqor Baasaweyne hadalka ku adkeeyey in aanay diidi karin oo duco iyo habaar waalid ay mid qaadato. Sideedabana amiiradda Boqorkeeda ayaa u taliya, oo go'aankeeda leh ayuu ugu gebogabeeyey hadalka. Carraaba aad bay u niyad jabtey wax ay ku warcelisana waa ay garan weydey! Musiibo aanay fileyn baa cirka kaga soo dhacdey! Iyadoo gunuunuceysa oo gunuuseysa ayay taliskii looga talinayey qasriga boqortooyada iskaga baxdey oo ay qolkeedii si quusasho leh isugu tuurtey sariirteedii. Cabbaar kolkii ay oydey oo ilintii ka dareertey baa waxa usoo gashey hooyadeed boqorad Cosob. Wixii ay sasabtaba, oo waaniso, oo talo iyo tusaaleba u guudmarto waxa ay ku qanicisey in ay raalli ka noqoto guurka ina adeerkeed oo aysan aabbaheed ceebaynin maadaama uu yahay boqor aad looga qaddariyo loogana baqdo carriga uu ka taliyo.

Weftigii sidaa baa la isku afgartey iyo in diyaar garow aroos oo labada boqortooyo ka dhex dhaca la yagleelo. Carraaba dhinaceeda aad baa loo diyaariyey oo xinne, cusbur, sacfaraan, huruud iyo wixii duul haween oo dhan lagu qurxin iyo naashnaashi jirey baa lagu dalluugey. Dhalaalkeedii baa dhalaal dhaafey oo ay noqoteyba sidii muraayad la isku daawanayo. Waxa laga dhigey aroosad u diyaar ah in boqortooyo uun badan u talisa laga guursado oo la geeyo tii ay ka soo hayaantey mid lamid ah oo aan ka dhicin. Marar badan waxa Carraaba maankeeda kusoo dhacey jinkii reer Axmar ee ku reebay raad jidhkeeda iyo maankeeda sidii sibaaq lagu seydhay giddaar ugu dhegay, balse waxa ay isku illowsiisaa hadallo ay kamid yihiin; "Ma soo noqon doono, dibna isuma arki doontaan ee waxaas maankaaga ka saar. Haddana gabadh marwo ah baad noqon doontaa, nolol cusub inaad bilaabato oo waxaas hore aad illowdo ayaa kuu wanaagsan".

Jinkii reer Axmar laftiisu ma uusan u iman Carraaba intii yagleelidda arooska lagu gudo jirey. Meel alla meel uu jaan iyo cidhib dhigey la waa!! Tolow xagguu qabtey? Bal adba!! Carraaba lafteedu kolkii ay weyddey jinkii waxa ay ka quusatey warkiisa iyo rejo dambe oo dhinaciisa ah. Waxa ayna billowdey ka firkiradda arooskeeda iyo in ay isku maaweeliso ka bixidda noloshan iyo sariirtan cidlada ah ee nacladdu ku dhacdey!! Waxa ayna u haqan taageysaa in ay tagto xariir lala wadaago oo dhidiidka iyo reenku ka baxo!! Dhinaca kale ee boqortooyada Carraaba guursaneysa ee boqortooyada Geesaweyne waxa la diyaariyey wiilkii amiirka ahaa ee boqorku dhalay oo ahaa Amiir Warfaa Geesaweyne. Amiir Warfaa waa nin maahsan, bilaa dhug ah, dumar aan haweysan iyaguna aanay haweysan, wax matare dhinac kasta ah lagu xanto. Marar badanna waxa uu boqor Geesaweyne ka shakiyaa in uu dhalay alle doorigan ceebeeyey! Waxaana rag qasriga boqortooyada ka mid ah kula taliyeen boqor Geesaweyne in Warfaa uu u guuriyo amiirad Carraaba Baasaweyne aynna kaga filnaan doonto arrimihiisa, noqon doontana mid asturta ceebtiisa intaan uunka loo taliyo iyo boqortooyaduba wada ogaan. Sidaas ayuuna boqorku ku aqbalay taladaas oo uu ugu doonay Carraaba.

Amiir Warfaa intii la toostoosin karayey lagama hagran, kol codka iyo hadalka loo toosiyo oo dubaaqda iyo suugaanta la isugu ladho iyo waxa uu ku odhan lahaa Carraaba, kol labbiska loo habeeyo oo kuwo aan indhuhu qaban abid loo xidho, kol muuqa sare iyo saanta loo dhalaaliyo, kol awoodda iyo murqaha leylisyo adag loo diro iwm, Se abuur iyo toosin abuur baa horreysee waxba waa laga beddeli kari waayey amiir Warfaa. Laga daal oo lagu noog lagana quusey!! Waxa se talo kusoo biyo shubatey in sidiisa loogu aqal geliyo Carraaba, wixii ay kala dheefaanna laga dhursugo. Wixii labada dhinacba midba xaggooda la isasoo naashnaasho, waxa la gaadhay dharaartii uu ku beegnaa aroosku, waxaana Carraaba loo soo galbiyey xaggaas iyo boqortooyadii boqor Geesaweyne. Mashxaradda, alalaaaska iyo farxadda ayaa is qabsatey. Hobollada kuwii ugu codka baxsanaa ayaa maalintaa johoraddii geeska ee Carraaba heeso quluubta kasoo go'ay ku galbinayey. Ciyaarta iyo damaashaadka, ayaa is xidhey inta u dhexeysa labada boqortooyo ee tolka ah. Gashaanti kasta oo qasriyada lagu carbinayey maalintaa dibadda ayaa ay usoo wada dareereen iyagoo biyaha tufaya. Qaarkoodna ka makhruuqsan guurka Carraaba maadaama oo ay cidladii iyo kelinnimadii sidaa kaga baxdey halka iyagu ay cidlo iyo cadho ay ku lammaantahy faruurto ruug muddo kusii jiri doonaan ama uu lalis dafi doono!!

Waxa lasoo gaadhey qasrigii boqortooyada Geesaweyne, waxaana lagu soo dhaweeyey fan iyo qurux aan hore loo arag, damaashaad, raynrayn, farxad, duco iyo wixii dhalo boqortooyo isku maamuusi jireyba maalintaa la isulama hadhin si midba ka kale ugu tookho oo aan looga soo dhaweyn wacnaan. Waxa intaas kaddib la isugu tagey qeybtii arooska loogu talo galey kaas oo lagu diyaariyey hobollada kuwii ugu codka macaanaa, deedna halkaas ayey muddo dadkii ugu raaxeeyeen naxariistii dibnahooda kasoo burqaneysey. Markii aad looga dhugtey ayaa haddana loo kacey dhankaas iyo qeybtii gasiinka kala jaadjaadka ahi lagu sharraxey oo qof weliba uu dhinciisa ka galey. Xilli galab gaabana oo ay wali cadceeddu soo jeeddo ayaa durabadiiba la guda-galay diyaarinta waddaadkii labada caruus isku xalaalayn lahaa!!

Waddaadkii oo ahaa laftiisu mid boqortooyadu leedahay ayaa bilaabey isu xalaalaynta labada caruus, oo ku bilaabey in uu oggolaanshahooda uu weyddiiyo labada dhinac. Waxaana loogu koobey warkiiba haa iyo haggaag waddaadow. Warqaddii ayuu u qorey, ducadiina waa u raaciyey. Codkii aamiinta ee martidu ay tidhi ayaa gariiriyey qasrigii iyo dibaddiisaba. Lagu kala dareer qasrigii boqortooyada Geesaweyne, qof walbana u jeedsadey halkii hoy ama hayaan ka xigey. Amiir Warfaa iyo amiirad Carraaba ayaa la isugu xareeyey qol aad loo xardhey oo aan ishuba ka libiqsaneyn. Sariir aad loo gogoley, xariir midabkeedu rasiin xigeen buluug ah yahay, birkim aad u giiigsan, cabitaanno iyo khudaar kala jaad ah oo hareeraha ka taalla sariirta.

Carraaba oo dhoosha ka qosleysa, niyaddana ku heysa sida caawa aan hurdo iyo cidlo u jirin. Ayaa waxa ay ku billowdey hadallo macmacaan amiir Warfaa. Dabdeed, Warfaa illeyn waa afgadhooc aan weligii gabadh la haasaawine, waxa uu ku warceliyo ayaa uu garan waayey! Talo waa ku ciirtey!! Carraaba oo la yaaban waxa haya ee uu la aamusanyahay Warfaa, ayaa dhowr jeer oo is xiga isu raacisey "War maxaa ku haya? Ma afkaa lagu hayaa? Maaad hadashid?! " Mar qur ah ayaa Warfaa ku warceliyey: "Haaye, maxaad iga rabtaa? Iska seexo waa xilli dambee!". Yaab iyo amakaag ayaa Carraaba ku habsadey! Hoosta waxa ay iska leedahay hadallo ay kamid yihiin: "Doqonsanaa! Dullisanaa! Ma naag loo guuriyey buu leeyahay maxaad iga rabtaa? Ba'a! Naa malaa wuxu ninba ma aha kani ee wa la igu soo luggooyey?" Bal adba garo! Carraaba waa gabadh ilbax ahe, waxa ay damacdey hadduu badow ku noqdey, in ay kaga horrayso oo ay

xodxodato!! Waaba yaab naag nin xodxodanayso!! Gaaddada ayay gaaddada u saartey, horaaddo sida muca ku mudaya, bisayl dhaafey oo muddo khudaar iyo dheef boqortooyo lagu korinayey; oo cidlo iyo kelinimo aad u hadheysey.

Warfaa waa uu kala badbatey, hadalkii iskaga dhex yaac! Wadnihii aad buu u garaacmay, dhareerka ayaa ka qubtey. Dhididka ayaa kaga daran. Gacmaha iyo lugaha gariiraya cabsi darteed! Muxuu tolow la cabsanayaa? Ma bahal baa Carraabi? Bal adba!! Carraaba waxba ulama aysan hadhin, si kasta oo ay ku bilaabi lahayd toddobaadkii malabka waa ay sameysey. Kol ay istiimiso, kol dhunkasho kala daasho, kol hu'ga ka fududeyso, kol ay iyadu dhoolatus isugu muujiso, kol toosba ay ula hadasho, balse lagu kari waa warfaayow howshaada qabso! Waa halkii aabbihiiye "Waa Alle doori boqortooyada Geesaweyne ceebeeyey". Carraabi kolkii ay duco iyo habaarba ku weyddey habeenkaa wixii la isugu yimid qolkan aadka loo xardhey ayaa ay damacdey in ay iska seexato oo dhinaca sariirta dhigto, daalkii maantana ay ka nasato iyo safarkii dheeraa, waana ay kasii jeesatey waxmatarihii lagu soo luggooyey caawa. Warfaa laftiisa kama qasna ee isna dhinaciisa kale ayuu uga sii jeestey! Johoradii Geeska ee Carraabi kolkii ay dhinaca dhigteyba waxa maankeeda kusoo dhacay hadallo ay kamid ahaayeen: "Musiibadan caawa kugu habsatey maxay ahayd? Doqon baa wallee i helay! Ma kan baan la joogi karaa, caawa ii seexdayba!! Jinkii reer Axmar tolow miyuu caawa kuu soo duulo. "

Waagii ayaa sidii ay u fekeraysey Carraabi ugu baryey, oo cadceeddii ugu soo baxdey. Durbadiiba waa ay ka kacdey jiifkii, waxa ayna isu diyaarisey in ay qasriga u daawasho tagto iyo deegaannada ku dhow. Kolkii ay is diyaarisey ee ay soo baxdey, waxa durbadiiba ka horyimid ciidamo iyo shaqaale badan oo su'aalo kala duwan ku boobey balse uma ay warcelin oo waa iska dhaaftey kana huleeshay. Cabbaar kaddib waxa la isugu yimid qeybtii quraacda oo jaadad kala duwan ah. Ma cunto ayaa ka dageysa? Waa gabadh meesha xalay lagu cawaree? Cidlo iyo cadho lamid ah qasrigii laga keenay ayaa kanna kaga horreeyey uune!!

Qoyska boqor Geesaweyne arrinka waa fahamsanaayeen, haddana dhag jalaq looma siinin. Wixii ay dharaartii oo dhanba qasriga ku damaashaaddo Carraabi, maalintaa waxa ay marar badan ogaatey wax badan oo hore uga qarsoonaa. Kol ay qasriga meel kamid ah joogtey waxa dhagaheeda ku soo dhacayey hadallo kala jaad ah, kuwaas oo ay ku sheekaysanayeen jaariyadaha ka adeega qasriga boqortooyada ayna kamid yihiin: "Waa lagu luggoooyey midkan dhufaanan gabadha. In ay ka tashato ayaan kula talin lahaa, hadday i warsan lahayd. Gabdhihii qasriga ayaa wada diidey, oo isku halleyn kari waayey. Masaa Johoraddii Geeska ee Carraaba loo qariyey laguna darey, oo guri loogu xareeyey! " Wixii ay dharaartii oo dhanba ka fikirto arrintan oo maankeeda kolba su'aalo kala duwani kusoo dhacaan. Waxa ay Carraabi aad isu weyddiisey weyddiimo ay kamid ahaayeen: " Ma baxsataa? Xaggeed se tegi haddaabad baxsato? Illeyn amiirad la guursadey boqortooyadeedii hore kuma noqon kartee" Carraaba aad bay u werwersantahay, goobtanina waa mid ay ku soo lugo'dey, oo aan u qalmin in ay sii joogto. Sidii ay u fekereysey Carraabi waxa la gaadhey gabbal-dhacii. Mar qur ah waxa ay ku baraarugtey uun yeedhmada qaar kamid ah shaqaalaha. Laguna leeyahay: "Marwo waa gabbal-dhace, qasriga hore usoo gal ".

Carraaba oo aad u niyad jabsan, waxa ay si huleel leh oo ay ka cago jiideyso u gashey qasrigii boqortooyada. Waxa ayna toos u gashey qolkeedii xardhanaa, ee aan weli lagu gedgedoomin. Sariirtii baa ay ku jiifsatey, lugihiina waa ay kala baxsatey. Rejo kuma hadhin oo way ogtahay in

Warfaagii koranka ahaa usoo socdo si uu u ag jiifsado keliya. Warfaa wixii ay sugtaba waa u iman waayey. Cabbaar kolkii ay sugtey, oo sugtey ee ay ku daashey baa ay damacdey in ay iskaba seexato ciil dartii. Musiibo aanay weligeed maleysan baa qabsatey. Waxa ay Carraabi mar keliya ku warheshay iyadoo uu dhinaceeda jiifo qof soo carfaya. Waa udgoon aysan weligeed urin. Iyadoo la yaaban cidda soo dhabar jiifsatey, ayaa ay dib u jalleecday. Tolow waa ayyo qofkaasi? Ma Warfaa baa? Bal adba! Waxa indhaheedu ay markiiba qabteen jinkii reer Axmar, oo dhoolacaddeynaya, aad u dhalaalaya. Shacnigiisa ayaa asqeeyey maanka Carraaba. Deedna, isagoo hadallo aad u macmacaan kolba mar ku tuurtuuraya ayaa Carraabi is hayn kari weyddey oo ay sidii faraska ku booddey, laabtiisa carfeysa iyo teeda aan ka dhicin ayaa sidii birlabta isku dhegay.

Jinkii reer Axmar isku qaad Carraaba oo daba iyo dacalba, madax iyo minjo, kor iyo hoos, dhinac iyo dhinacba ka daluug. Carraaba iyo jinkii kolba dhan u laamadood, qolkiiba kuleyl sidii dhamacda oo kale ah isu beddel. Kolna Carraaba qadaadka loo dhig, kolna jinkii qadaadka iyo dhafoorkaba loo dhig. Adduunyo kale oo aana weligeed la arag baa ay ku jiraan Carraaba iyo jinkii reer Axmar. Hadalladoodii isku dhex daadey sidii qof koronto lagu hayo. Oo ma korantay ka dhacdaa hawshaasi?! Bal adba! Carraaba waxa ay la noqotey sidii sannad oo kale in ay dheegga dheegga isku hayeen. Way ku magmagtey jinkii reer Axmar, isaga laftiisu waa insi caashaqe waaba ka fuqi waayey, dhidid iyo dhareerba labadoodii ka dhamaa.

Goor ay waaberigii ku dhowdahay oo saqdhexena laga gudbey baa ay Carraaba iyo jinkii baraarugeen, oo miyirkii iyo maankiiba usoo noqdey. Tolow intii hore xagguu ku maqnaa? Bal adba! Jinkii oo fuuq iyo fuudba ka dhammaadey, itaal iyo tamarna beelay baa cabitaannadii sariirta hareeraha lagaga sharraxey lagu qabtey, oo qudhqudhiyey dhowr dar. Ma nafbaa ku hadhay? Gashaantii ciil ku gadhoodhey, oo xalayna mid dhufaanan loo xareeyey baa ku magmagtee!! Carraaba oo jaaheedu dhalaalayo ayaa qosol ka wedhay, oo farxad is hayn kari waydey. Jinkii reer Axmarna waa huleelay, oo cadceedduba uguma soo bixin aroortaas. Carraaba dharaartaas oo dhanba farxaddeeda iyo firfircooniddeedaba waa laga yaabay. Waxaana dadku is wayddiinayeen su'aalo ka yaabiyey oo fajac ku abuurey, gabadhii afbuurka iyo qalada la soo gashey qasriga waxa maanta sidaa ka dhigey wallee wax yar ma aha. Sidii caruusad labaad ayey noqotey, caawa oo kale aqal galeysa. Hurdo iyo nasashaba waa ay diidey, bishimaha mar qur ah iskuma aysan qabanin. War tolow weynaa waxa ka farxiyey Carraaba, oo aan beryahaa sidan noqon? Bal adba garo!

Carraaba wixii ay dharaartii iyo gabbal-dhacii oo dhanba faraxsanaato, waxa haddana lasoo gaadhey caweyskii kale. Sidii caruusad ku jirta habeenkeedii labaad ayay isu diyaarisey. Jaahii iyo jooggiina ay dhalaalisey. Waxase layaab noqotey, Alle doorigii Carraaba loo guuriyey tolow meeyey?! Lama oga meel uu ka dhacay. Waxa la sheegayey in uu khamriga isku daldalyey kob qasriga koonihiisa ku taalla. Adduun iyo aakhiro toona war uma hayo. Talo iyo arrinna haba sheegin. Marar badan in uu nin yahay iyo in uu isku jir yahayba shaki baa la geliyaa!! Carraaba iyadu baddaa ma hayso, beddelkiisii baa ay heshayba. Dan iyo muraad toona kama laha Warfaa iyo wixii la hal maalaba. Wixii ay sugtaba Carraabi, mar qur ah waxa daaqadda kasoo galay jinkii reer Axmar oo isaga laftiisu aan dabyar shideyn. Dhalaalka, udgoonka, widhwidhka, kamkamka ayaa baxaya. Salaanta diirran ee uu ku bilaabey ayaa qalbiga ka saaqdey Carraaba. Wixii ay isu sheekeeyaanba, waxa la isku bilaabey howshii xalay oo kale. Doorkan waa ka darantahay hawshu

dooorkii hore. La is baray! Qalood badani ma jiro, oo waaba la isku soo haliilayaa. Jidhku xubin xubin buu isula qabsadey, dubaaxin fara badan iyo gariir toona ma jiro. Cabsina hadalkeedaba daa.

Wixii ay habeenno iyo dharaaro badan ku jiraan xaaladdaas, oo jinkii iyo johoraddii geesku noqdeen ul iyo diirkeed, Warfaana la iska illaawey, ayaa uu jinkii damcay in uu Carraaba u kaxeysto boqortooyadooda ee reer Axmar ay leeyihiin. Waa laba uun oo aan shaqo iyo shuqul toona isku lahayn. Dad iyo Jinn baa ay kala yihiin. Isku deegaan ma aha, isku sinji ma aha, Isku dhaqan ma aha, isku nololna ma aha. Carraabi wixii ay talo iyo maankaba rogrogto, ugu dambeyn waxa ay go'aan ku gaadhay in ay oggolaato arrinkaas, aynna u raacdo jinka reer Axmar boqortooyadooda. Waxa ay isla garteen in goor habeen ah oo saqdhexe ah, habeenkuna uu cadde yahay ay isla baxsadaan. Habeenkii waxa uu noqdey dharaartaas go'aanka ay gaadheen habeenkeeda labaad. Haggaag iyo warsan ayaa lagu kala tagay. Kolkii habeenkii la gaadhay, ayaa Carraabi is diyaarisey, wixii qasriga ka yaallay oo aan badnaynna ay uruursatey. Jinkii baa xilligii lagu ballansanaa isagoo ka tuuraya daaqadda kasoo galay. Waxa uu watey wax u eg go' shaal, balse ka ballaadhan. Midabkiisu aad u madowyahay dugul ah. Wuxuuna u sheegay Carraaba haddii ay huwato go'an in ay qarsoomi doonto si fududna ay qasriga uga baxayso.

Sidii ayaa ay Carraabi yeeshay, go'iina waa ay isku dabooshey. Mar keliya ayaa qarsoontey, oo meel ay jaan iyo cidhib dhigtey la waayey. Jinkii iyo iyada oo keliya ayaana isu muuqda, oo aan uun seddexaad wehelin. Dibadda uga bax qasrigii, kolkii ay dibadda hubsadeen in ay joogaan, ayaa ay iska feyddey go'ii. Dabadeedna ay raaceen fardihii uu jinku diyaariyey, oo aan xawaare hore loo arag ku ordaya. Durbadiiba waxa ay gaadheen qasrigii reer Axmar, oo baaxadda uu ku fadhiyo aan weli indho Aadame qabanin. Waxa jin joogana aan faro iyo indho toona lagu tirin karin.Maamuus iyo meeqaam aad uga duwan kii dadku yaqaannay, ayaa lagu soo dhaweeyey Carraaba iyo jinkii. Carraaba waxa ay la ashqaraartey uunkan ay u timid. Dad uun baa ay aragtee ma jin baa ay wax ka taqaan? Carraaba wixii ay muddo badan sheekooyinkan ku maqli jirtey, ayaa hadda indhaheedu qabteen oo xaqiiqo ah. Farxad badan, ayaa foolkeeda ka muuqata. Boqorkii iyo boqoraddii boqortooyada ka talinayey, ayaa si aan la qiyaasi karin usoo dhaweeyey. Kobtii ay qasriga ka degi lahaayeenna kal hore ayaa ba loo sii diyaariyey. Waxa keliya ee hadhay lana sugayey waxa uu ahaa imaatinkooda.

Dhinacii kale ee boqortooyadii lagu qabey ee Geesaweyne, aroortii baa lagu warhelay in aysan joogin qolkeeda. Qasrigii oo dhan ayaa laga raadiyey. Oo miyay helayaan? Dhammaan deegaannadii ka ag dhawaa boqortooyada ayaa haddana laga raadiyey laga waa halkaasna. Meeshii ay boqortooyadu u talineysey oo dhanba waa laga raadiyey, ama in uun wax ku tuhmeysay. Balse talo waa ku caddaatey; oo waa ay waayeen Carraaba. Dhinac waa ka ceeb—oo gabadhii ay soo guursadeen gacantooda waa ay ka baxdey. Dhinacna waa ku dhabarjab oo boqortooyadii ay gabadha kasoo guursadeen ee Baasaweyne, ma maqli karaan "Gabdhii waa la waayey iwm!'.

Waxa uu boqor Geesaweyne go'aan markan ku gaadhay, in uu wargeliyo boqortooyooyinka ka ag dhow. Kana codsado in ay ka caawiyaan raadinta Carraaba. Dhowr kamid ahaa kuwii ka ag dhawaa boqortooyada, ayaa ka oggolaadey arrintaas. Geeskii Afrika badankiisa waa laga raadiyey Carraaba, marka laga tago meelo yaryar oo aan boqortooyo ka jirin, tegisteedana aan loo arkin wax muhiim ah. Kolkii talo ku gadhoodhey boqortooyadii Geesaweyne, ee arrinna

aysan gacan ku hayn, waxa ay talo ku gaadheen golihii sare ee boqortooyadu, in loo sheego wixii jira boqortooyadii gabadha laga soo guursadey ee Baasaweyne.Farriin aad u weyn, oo hadyad iyo adduunba wadata ayaa uu boqor Geesaweyne u direy boqorkii ay ilma adeerka ahaayeen ee Baasaweyne. Safar baa la yagleelay, amnigiisana aad looga taxaddaray ayaa farriintii loo dhiibey. Wixii uu soo socdaba waxa uu ugu dambeyn gaadhay boqortooyadii Baasaweyne. Aad baa loo soo dhaweeyey safarkii, waxa aynna la kulmeen boqorkii Baasaweyne.

Loo dhiib farriintii iyo hadyadii aadka u qiimaha badnayn. Baasaweyne aad buu ugu farxay hadyadan judhii uu arkayba. Riyaaq aad u badan baa laga dareemayey jaahiisa. Waxa uu niyadda iska lahaa: "Abaalkaagii ayay gudi kari waayeen, markaa wixii ay hayeenba malaa waa ay kuu soo dhiibeen" iyo "Tolow ma gabadh kale ayaa ay kaaga fadhiyaan duulkii aad ilma adeerka ahaydeen?". Waxase mar keliya amakaag iyo fajac ku noqotey markii uu gacan yarihii boqorku uu akhriyey warqadii farriintu ku xardhanayd! Boqorkii Baasaweyne indhihii waa ay guduuteen, misena midabkoodii ka tageen. Wejigii dhidid xanaaq ayaa kasoo daatey, jidhkii oo dhan waa uu adkaaday. Mar keliya ayuu koofiyaddii boqornimada ee madaxa u saarnayd samada u xoorey, kuna qeliyey: " SIDEE AYUU KU KEENAY IN UU WAXAAS IIGU SHEEKEEYO ANIGA OO BAASAWEYNE AH? MIYUUNA OGAYN IN AAN DHIMASHO KA XIGO GABADHAADII CARRAABA AYAA LA WAAYEY? WUU OGYAHAY INAAN AABBIIHII IYO ADEERKIIBA AANU DILNAY, MAANTANA MA DAGAAL KALE AYUU DAMCSANYAHAY?".

Durbadiiba, waxa uu Baasaweyne ku kacay fal aan la mahadin. Waxa uu askartiisii ku amrey in safarkan inta uu ka tiro le'egyahay oo dhan la gawraco, oo dhagta dhiigga loo daro. Lagana soo reebo hal nin oo jawaabta u qaada Geesaweyne. Sidii ayaana askartii ay yeeshay, oo dadkii lagu sameeyey. Deedna waxa uu haddana amrey boqor Baasaaweyne in dhammaan safarka kurarkooda lasoo uruuriyo, kaddibna laba faras lagu kala raro inta meel lagu guro. Ninka soo hadhayna faras gaar ah la saaro, seddexdaas farasna loogu diro Geesaweyne. Warqad farriin ah oo dhiigii dadkii safarka ahaa ee ka yimid Geesaweynana lagu qorey, ayuu uu ugu dhiibey ninkii safarka hoggaaminayey. Ninkii safarka ku keliyoobay iyo kurarkii dadkii hadyadda martida loo dhigay ayaa si baqasho iyo cago jiid ku jirto goobtii qasriga boqor Baasaweyne ka huleelay goor ku beeggan galab. Wixii ay socdaanba, oo waddo adag uu keligii sii dhex jibaaxaba, ugu dambeyn waa uu gaadhay qasrigii boqor Geesaweyne, isagoo aad u tiiraanyaysan. Geesaweyne oo dhinacna iska leh "Tolow miyuu kugu soo diidi doonaa hadyadda?" Ayaa waxa dalaq usoo dhahay ninkii oo cataabaya, ooyaya, naxsan oo fajac ku dhammaadey!

Durbadiiba waxa lagu boobey "War maxaa ku helay? Hadal, maxaad la aamusantahay?" Ayuu mar keliya ku boobay hadal ahaa sidatan "Boqoroow, boqoroow, boqor, waxa dhacay…. Waa nala laayey… hh. Eh, ah, adigana haydad kale oo dad la diley ah ayuu … kuusoo dhiibey". Boqorkii naxdin ayaa kasoo hadhay! "War bal na tusa waxa uu sheegayo" ayuu yidhi. Labadii faras ayaa laga soo dejiyey kurarkii dadka, oo qalaley, dhiiggiina ka dhammaadey. Dadkii qasriga joogey oo dhan amakaag iyo dhabannahays baa kasoo hadhay! Waxa lala yaabay falka uu ku kacey nin boqor Baasaweyne, weliba uu kula kacay boqor ina adeerkii ah. Boqor Geesaweyne laftiisu aad buu uga xumaadey, haddana uga cadhoodey, misena uga kululaadey falkaas uu ku kacey Baasaweyne. Waxa uuna ku baaqey dagaal lagu baabi'iyo boqortooyada Baasaweyne. Taas oo dhagta dhiigga loogu darayo, lana qabsanayo. Wixii ciidan, qalab, sahay iwm. Ayaa uu Geesaweyne diyaarsadey. Waxa uuna ciidankiisii u qeybiyey toban guuto, oo

middiiba ay ka koobantahay shan kun oo askari. Tobanka guuto waxa kala hoggaaminaya Amiir Warsame Geesaweyne, oo boqorku dhalay, Amiir Warsame inankiisa oo isna la dhaho Guutaale Warsame. Laba oday oo ay Geesaweyne walaal yihiin oo kala ah: Madaxweyne, Ciilweyne iyo laba wiil oo labada oday dhaleen oo kala ah: Xirsi Madaxweyne iyo Ibraahin Ciilweyne. Toddobadaas is dhalay oo boqor Geesaweyne sideed ku yahay, waxa kale oo weheliya laba dagaalyahan oo kamid ah ragga uu soo korsadey boqor Geesaweyne oo iyagana lakala dhaho Awseed iyo Olol.

Geesaweyne markii uu is diyaariyey, waxa uu damcay in uu farriin ogeysiis ah u diro boqor Baasaweyne, taas oo uu ku tilmaamayo in uu dagaal diyaar u yahay. Farriintii waxa loogu dhiibay mid kamid ahaa raggii askarta, si degdeg ah ayaan ay u gaadhay. Baasaweyne waaba inta uu doonayey middaasi. Isaga oo dhoosha ka qoslaya ayuu yidhi: "War bal eega, kii aanu guumeysan jirney baa maanta dagaal noogu baaqaya! Sow gunnimo maaha haddaanu faraha laabanno?" "Haa boqoroow" baa loogu jawaabay. "Maxaad sugaysaan, ina diyaariya" ayaa uu Baasaweyne cod weyn oo kibir iyo xanaaq ka muuqdo ku yidhi. Boqor Baasaweyne waxa uu diyaarsadey ciidan ka kooban shan guuto. Taas oo middiiba ay ka koobantaahy lix kun oo askari. Waxa shantaas guuto kala hoggaaminaya boqor Geesaweyne, wiilkiisa Amiir Doolaal Baasaweyne, wiilkiisa kale ee Mahadle Baasaweyne iyo laba wiil oo walaalkii dhalay oo kala ah: Muumin Aw Xabeeb iyo Ducaale Aw Xabeeb. Wixii qalab iyo sahay iyo weliba fardo la gaadiidsado la helayey waa la diyaarsadey. Dagaalku waxa uu ka dhacayaa waa banka u dhexeeya labada boqortooyo, oo weliba ay xagga Koonfurta u badanyahay banku. Waa meel milicdu ku leefayso. Hanfiga ka jira, jidhku uma adkeysan karo, siib ahaan maalin dharaar cadday ah. Wixii la isusoo xamaan uruursadaba waxa la isugu yimid goobtii lagu ballansanaa. Qolo walba seefta ayaa u sifeysan, qalabkii lagu gaashaan jireyna waa ay xidhantahay. Haba lakala batee, balse wax baqasho ahi ma jirto.

Dhinaca kale Carraaba war uma hayso waxa ka dhex dhacay labadii boqortooyo ee midna ay ka dhalatey, midna ay soo guursatey. Taas oo weliba iyada madaxeeda la isu leynayo, oo dhiig in loo daadiyo seefaha loo sii listey. Waxa ay ku jirtaa nolol kale, kama qasna. Raynrayn iyo faraxad xadkeedii dhaaftey, oo jinkii xattaa ka yaabay ayaa ay ku dhex jirtaa. Habeen iyo dharaar jinkii reer Axmar iyo iyada(Carraaba) ayaa sariir aanay hore isheedu u qaban ku dul loollama. Horraaddadeedii aadka u giigsanaa, hadda waa dabceen oo cabbirkoodii hore dhaafeen. War tolow jinku siduu gabadha yidhi? Bal adba!

Dhanka kale bowdyihii iyo badhyihiiba waxa ku laba jibbaarmay baruur iyo hilib mise biyo jin wax loo kala garan waayey. Carraaba waxa aad mooddaa in cidladii u dhaantay, sidan hadda ee jiif iyo joogba lagu jilciyey ee taaha iyo reenkeeda uu gudcurka kasta guuguuluhu dhegta u taago. Marar badan iyadoo qadaad u jiifta sariirteeda cusub ee sharraxan, oo dhinacna xariirta ay xidhantahay ay ka feydantahay. Bowdyooyinkeeduna ay midba midda kale ku xoqmeyso. Marna inta ay cidhibteeda soo qaaddo, ay ku duugeyso cajarradeeda ayay tidhaa: "Eebbaan ka baryaa, in uusan igu celin Warfaa dhoohane" Dhoohane aa? Oo tolow maxay magacan ula maagtey? Bal adba! Wixii shaqeysan waayo oo dhan baa magac xun istaahila malaa!! Mar keliya isma aysan weyddiin waxa ay ku suganyihiin labadii boqortooyo ee Geesaweyne iyo Baasaweyne. Xattaa maankeeda kuma aysan soo dhicin. Waxaadba mooddaa in ay boqortooyada jinka ee reer Axmar ay ka dhalatey, ku kortey, kuna weynaatye oo lagu qabo immikana. Yaab!! Duqeydii igu soo

baxdey banka labada boqortooyo u dhexeeya, waxa ay bilaabeen guubaabadi ciidanka mid weliba dhinaciisa. Waxa uu Baasaweyne isagoo kor u qaadaya seeftiisa yidhi: “Maanta waa inaan dhiiggiisa daadiyaa Geesaweyne, ama waa in kayga la daadiyaa. Ma dhici doonto in labadayaduba aanu badqab kaga baxno goobta“.

Geesaweyne isaguna isagoo giir aan yareyn iska kicinaya waxa uu yidhi: “Labada boqortooyo ama anaa xoog iyo seef ku kasban doona, ama labadeennaba waa la ina waayi doonaa, oo aakhira ayaa aynnu wada tegi.“ Mar keliya ayaa seefihii kor loo taagey, leebkiina la cabbaystey, waramaantiina la isku soo jeediyey. Waxaana lagu kala qeliyey “War gala cadowga” iyo “War gala cadowga”. Wixii la isjafaba, ee birta la iska aslo. Waxa gaadmadii ugu horreysay lagu diley Amiir Doolaal Baasaweyne. Waxa soo gaadey, mid kamid ah labadii nin ee uu soo korsaday boqor Geesaweyne oo magaciisu ahaa Olol. Olol waa nin aad u shiish daran, misena ganitaankiisu aad u kululyahay oo aanad dhulka ula dhacayn hadduu kula helo. Mar Alla markii lagu war helay in la diley Amiir Doolaal. Waxa uu jab weyn soo waajahay guutadii uu hoggaaminayey, oo ka dagaalamaysay aagga bidix ee ciidanka boqor Baasaweyne. Markii la arkay in aad loo jafay guutadii Doolaal, waxa uu Baasaweyne amar ku bixiyey in uu hoggaaminta la wareego ku-xigeenkiisii abbaanduulanimo; oo ay ilma adeer seddexaad ahaayeen. Abbaanduulihii cusbaa aad buu u adkeeyey guutadii, gummaadkiina waa uu ka yaraaday sidii hore. Weerar ba’an iyo difaac adagba waa uu ku tallaabsadey. Waxase musiibo haddana ku noqotey ciidankii Baasaweyne, in mar labaad laga diley Muumin Aw Xabeeb oo walaalkii dhalay, guutadii uu hoggaaminayeyna cagta la mariyey. Firxadkiina ay guutooyinkii kale ku kala biireen. Dacalkii guutada Muumin ahayd, hadda waa bannaanatahay. Waa cidla’ aan axad taagani uusan jirin.

Wixii la is jafaba oo boqolaal ciidan kor u dhaafaya birta laga aslay, oo labada dhinac ah. Halka garabka Baasaweyne laga diley laba abaanduule oo guutooyin hoggaaminayey. Ayaa uu abaanduulihii labaad ee Muumin Aw Xabeeb booskiisii waxa la geliyey ku-xigeenkiisii. Aaggii dacalka ahaa ee bannaanaadey, waxa is yidhi ka faa’ideysta ciidankii Geesaweyne. Waxa se ay noqotey mid ay ku hungoobeen. Waxaana meeshii qabsadey ku-xigeenkii Muumin. Ciidan kusoo wajahnaa oo uu watey Xirsi madaxweyne waa la jebiyey. Waxaana la diley oo lala helay shiishka Xirsi oo ahaa abaanduulaha guutada. Guutadii dhexe ee uu hoggaaminayey Mahadle Baasaweyne, waxa ay aad u xoojisey dhinaca weerarka. Waxa aynna horseeday in la dilo Madaxweyne oo ahaa Geesaweyne walaalkii, iyo wiilkii uu adeerka u ahaa ee Ibraahin Ciilweyne. Labada dhinac hadda jabku waxa uu ku badanyahay dhinaca Geesaweyne, walow uu isagu markii hore ku horreeyey. Dhimashadii waa tiro beeshay, dhaawacuna waa xad ka bax. Waxa la gaadhey xilligii gabbal-dhaca, weli ciidankii waa is ku jiraa. Fari kama qodna. Waxase aad mooddaa in dhinaca Baasaweyne, maadaama uu ka ciidan yaryahay in ay daciifeen tiradoodu. Kolkii se lagu war helay in gabbal-dhac ay tahay, oo cadceeddii godkii ku galbatey. Ayaa dib loo kala gurtey, qolo walbana dhaawaceedii iyo meydkeedii qaadatey. Garab walba waxa uu dib ugu sikaday boqortooyadii aag u dhow. Sahay iyo tamarin kale wixii uu heli karaayey habeenkaas ayaa uu dirsadey. Geesaweyne waxa laga diley Madaxweyne oo ahaa walaalka iyo laba uu adeer rumaata u yahay Xirsi madaxweyne iyo Ibraahin Ciilweyne. Halka Baasaweyne laga diley wiilkiisii Doolaal iyo wiilka walaalkii dhalay Muumin Aw Xabeeb. Balse labada dhinac tirada ciidanka kale waxa la diley boqolaal wax kor dhaafaya. Qolo weliba, waxa

ay sii qorsheysay qaabdhismeedka dagaal ee ay berri ku dagaal geli doonto. Berri waa kolka lakala baxayo, oo midkii roonaada labada boqortooyo u hadhayo.

Aroortii hore, kolkii cadceeddu ay soo iftiintey ayaa heegan labadii dhinac mid walba galey. Dhinac walba waa karaar qaatey, sahay iyo kaabis badan oo tii hore ka xoogweyn ayaa la isu carbistey. Labada boqor ee Geesaweyne iyo Baasaweyne waa isu dhaarsanyihiin. Kolki labadii ciidan mid walba dhinaciisa kasoo saftey; oo leebkii iyo qaansadii la isa saarey, warankii la isu jeediyey, isagoo gaashaanku weheliyo. Waxa mar keliya lagu qeyliyey sidii caadada u ahayd "Haddaad noolaataan maanta!" iyo "Haddaad idinkuna noolaataanba!". Dagaalkii kolkii uu cabbaar socdey; welina la ismari kari la'yahay. Milicduna soo kululaatey, waxa haddana si gaadmo ah uu dagaalyahankii kasoo jeeday boqortooyada Geesaweyne ee Awseed uu waranka la helay Ducaale Aw Xabeeb oo Baasaweyne adeer rumaata u ahaa. Dhulkaba ulamuu dhicine; waa rawaxey. Guutadii uu hoggaaminayey talo xumo baahsan baa soo wajahdey. Halka guuto uu hoggaaminayey Awseed ay qeyb kamid ahi badhtanka u gashay guutadii Ducaale, gumaad afarta jiho ah oo aan xad lahayn baa haleelay guutadii. Wixii soo hadhay ee firaxadka ahaa waxa ay kala noqdeen kuwo dhabarka sii jeediya; oo cagta la mariyo iyo kuwo guutooyinkii kale ee Baasaweyne ku kala biirey oo aan tayo lahayn.

Dhabarjab aad u ballaadhan baa soo wajahay Baasaweyne, abaanduuliyaashii ugu khatarsanaa ee guutooyinka hoggaaminayey seddex kamid ah ayaa laga diley. Waxa soo hadhayba waa guutada Baasaweyne iyo guutada wiilkiisa ee Mahadle Baasaweyne. Seddexda guuto ee kale waxa hoggaaminaya ku-xigeennadii abaanduulayaasha oo aan khibrad iyo dagaalyahannimo xirfadeed aan lahayn! Talo waa cakirantahay; Baasaweyne fartuu dhexda ka qaniiney. Ciidankiisii waa yaraadey, waxa uuna kolkan ciidankii noqdey afar guuto; iyo inyar oo firxadkii guutada shanaad ahayd oo ku kala biirtey afarta kale. Xaaladdu hadda waa qadhaadhaatey; dacar la leefay baa ay noqotey. Waxa dagaalamaya waa 10-guuto oo laba abaanduule laga diley, kaddibna ku-xigeennadoodii ku buuxiyey; oo waa dhinaca Geesaweyne. Halka Baasaweyne isagu hadda uu ka koobanyahay afar guuto, lagana laayey hal guuto dhammanateed. Lagana diley seddex abaanduule oo miisan culus lahaa. Waxa se hadda Geesaweyne uu xoojiyey dhinaca weerarka; taas oo horseedday in aad loogu siqo, ciidan badanna laga gumaado, oo u badneyd kuwa dhulka.

Guutaale Warsame iyo labadii Geesaweyne soo korsadey ee kala ahaa Olol iyo Awseed, waxa ay ciidankii Baasaweyne ku sameeyeen dhabarjab aad u ballaadhan, waxa aynna kaga soo wareegeen hal jiho oo dhanka bidix ah oo daciif noqotey iyo laba jiho oo xagga dambe ah. Waxaana halkaas lagu baabi'iyey guutadii ugu xoogga badnayd ee uu hoggaaminayey Mahadle Baasaweyne, walow uu Mahad dhaawac culus soo gaadhay. Kaas oo sababey in nolol lagu qabto, lana qafaasho isagoo dhaawac ah. Waxa ay arrintii isugu soo biyo shubatey seddex guuto; oo laba ku-xigeen iyo Baasaweyne ay kala hoggaaminayaan.

Seddexdii guuto waa la hareereeyey; afarta jihaba waa lagaga xoomey. Hal mar ayaa tobankii guuto ee Geesaweyne ku bilowdey. Aad baa loo jafay oo meydkooda la taxay sidii tusbax go'ay ciidankiii Baasaweyen. Waxa cagta la mariyey dhammaan ciidankii aan ka ahayn guutadii Baasaweyne. Waxa keliya soo hadhay guutadii Baasaweyne, iyadiina biyaha looma kaban. Baasaweyne waxa gacantiisa seefta madaxa uga gooyey boqor Geesaweyne. Waxa uuna soo qaatey madaxiisii oo keliya. Geesaweyne oo aad isula weyn, libin aan la dheyelsan karinna

gaadhey. Ayaa cod weyn ku yidhi: “MEEYEY BAASAWEYNE? MEEYEY BAASAWEYNE? ANIGAA ISKA LEH LABADA BOQORTOOYO?” Isaga oo madaxii gacanta bidix ku laalaadinaya, halka gacanta midigna seeftii oo dhiig leh ku heysta. Ayaa uu u jaqaafiyey una hayaamey dhankaas iyo boqortooyadii Baasaweyne. Kolkii uu gaadhay boqortooyadii Baasaweyne, waxa uu jebiyey albaabkii oo waxooga ciidan ah ilaalinayeen. Intiina cagta ayuu mariyey; oo mabuu kusii hakanin. Itaal badanna maba aysan lahayn. Kolkii uu qasrigii galey, dadkii oo u badnaa dumar iyo caruur ayaa afka gacanta wada saarey. Oohin iyo naxdin, amakaag iyo afkala qaad baa kasoo wada hadhay!!

Geesaweyne isagoo aad u dhoolacaddeynaya, si kibir lehna cagaha u jiidaya waxa uu dadkii qasriga ugu khudbadeeyey: “Maanta wixii ka dambeeya aana ka talinaya boqortooyadan. Cid iga dabo hadli kartaana ma jirto. Waxaanad ku qasbantihiin amarkayga oo aad yeeshaan; haddii kale dhegta ayaan dhiigga idiin darayaa, hal qofna iga badbaadi maayo!”. Geesaweyne waa u quus gooyey dadkii, doorasho iyo go’aanna ma leh. Waxaan dhimasho cadaab leh iyo raacitaanka Geesaweyne ahayn ma jiraan. Waxa aynna ku qasbanaadeen in ay raacaan Geesaweyne amarkiisa. Geesaweyne durbadiiba waxa uu qorsheeyey isku xidhka labada boqortooyo. Tiisii hore waxa uu boqor uga dhigey wiilkiisa Amiir Warsame Geesaweyne, waxa uuna u guuriyey gabadh uu dhalay Baasaweyne weliba si qasab ah. Isguna waxa uu u wareegay boqorooyadii Baasaweyne, waxa uuna qasab ku guursadey boqoroddii Baasaweyne ee boqorad Cosob. Dumarkii qasriga ee la wada qabeyna, waxa uu si qasab ah ugu darey raggii boqortooyadiisa kasoo jeeday ee abaanduulayaal ahaa ama askar ciidan ahayd! Nidaam kelitalis dadkii kasoo jeeday boqortooyada Baasaweyne bahdiley, oo sharaftoodii dhulka ku jiidey ayaa meeshii yimid. Xattaa waxa uu Geesaweyne qasrigii Baasaweyne ka dhex furey, goob lagu kireeyo dumarka la isirran Baasaweyne, oo jidhkooda lagaga ganacsado.

Carraaba baddaa ma hayso, war iyo wacaalna kama hayso halka uu xaal marayo. Dhoohanaan iyo maahsanaan xadkeedii dhaaftay ayaa hareeraha ka dhabanaanisey. Horaa loo yidhi “Seddex yareyso: galmo, cunto iyo hurdo” Carraaba malaa waxa laga raacay galmadii lagu fuley! Mooji! Bal adba garo!! Talo iyo arrin waayo hore ayaa ugu dambeysay. Maankii iyo maskaxdiiba waxa ka xaday jinkan reer Axmar, oo dharaar iyo mugdiba labadeeda bowdyo ku dhex jira. Werwer, wacaal midna kama qabto ciddeedii ay kasoo baxsatey. Weli waa sideedii, maankeeda kuma soo dhicin weyddiin dhankaasba la xidhiidhta! Waxa, se musiibadii iyo halaagii dhacay ka war helay jinkii Reer Axmar. Laftiisu aad buu uga argagaxay waxa dhaca. Tab iyo maaro uu ugu sheego Carraaba ayaa uu garan waayey. Kol kasta oo uu damco in uu arrinta la wadaago, afka ayaa la qabtaa oo hadalba waa kasoo bixi kari waayaa! Maxaa haya tolow?! Habeenno badan ayaa isagoo marna lugaheeda ku kala dhex jira; oo uu reernkeeda la asqeysanyahay is yidhi u sheeg arrinka. Inta ay meel kale ka ogaan lahayd; oo arrinku dabo xumaan lahaa. Waase ku dhici waayey, oo talo waxa uu ku gadhaadhay in uusan habeennadiisa malab dhaafay iska dacarayn!!

Ugu dambeyn se Carraaba arrinkii waxa la wadaagey oo daaha uga qaadey habaar qabe ay jinka reer Axmar walaal yihiin. Kasoo damac xooggan uga jirey Carraaba loxoskeeda iyo cabbaadhyaheeda in uu mar uun iska laalaadiyo. Habeen roob mahiigaan ahi miray boqorooyadii, oo wixii banaanka joogayna ay soo wada radeen. Ayaa uu fursaddii ka faa’idaystay waxa uu Carraaba oo keligeed qolkeedii markaas uun gashay, kaga daba galay. Iyadoo timaheedii qallajineysa ayaa uu warkii oo kulul dhegaha u saaray Carraaba. Dhalleecayn

iyo laba wajiilenimo badanna ugu dhex daraya, oo uu ku ganayo jinka ree Axmar ee ay marwada u tahay!!

Carraaba mar qur ah ayaa beerku hoos u go'ay. Adduunkii ayaa ku yaraadey, neeftii baa kasoo bixi weyday! Wadnihiii aad buu u garaacmay, mise u boodboodey! Faruuryihii ayaa jareeyey sida qabow in uu galay. Jidhkeedii oo dhan dareenkii baa ka go'ay sida kabuubyada. Warka soo gaadhay waxa uu la noqon waayey u qaadan waa. Lama filaan aysan weligeed ku fikirn in sidaasi dhici doonto. Oohin iyo baroor ayay qabsatey qolkeedii dhexdeediisii. Kolkii uu habaar qabihii hubsadey warraaqa Carraaba, ayaa uu ka baxay qolkeedii. Madax iyo minjo wixi qasriga joogay oo dhan ayaa isugu soo xoomey qolkii Carraaba. La weyddii waxa dhacay ee ay la barooraneyso? Indhaha ayay warkii kaga dhufatey. Kii qabey ee reer Axmar oo amankaag ku dhacay kolkii garowsadey in ay warkii ogaateyna. Candhuuf iyo cidiyo ayay ku salaantay!

Waa laga qabqabtey, loogan sheegay in arrinka la wada ogaa balse iyada laga qariyey. Kolkii ay dhageheedu intaas maqleen, ayaa ay sidii miino oo kale u qaraxday. Wax Alla wixii meesha taagnaana wada hiiftay, oo indhaha ku gubtay. Waxa ay damacday in ay qolkii iyo qasrigiiba ka baxsato; oo ka jarmaaddo. Waa lasoo qabtey, loona sheegay in marba haddday qasrigan reer Axmar timid ay dhimasho mooyee, si kale uga tagi karaynin. Qolkeedii ayaana dusha looga xidhay, oohin iyo cabaadkeeda oo baxanaya dhagaha laga fureystay!! War illayn jinku waa cadow!! Murugo, xanuun, ciil, werwer ayaa lasoo dersay Carraaba. Wax Alla wax ay samayso ayay garan weyday. Cid usoo gasha, oo il saaro waa laga xaaraantimeeyey. Dheef ay jidiink marisana hal mar oo dharaartii ah mooyee, waa loo diidey. Ciqaab iyo cadaab aan yarayn ayaa lagu bilaabay johoraddii geeska ee Carraaba. Maydhasho iyo maqaarkeeda oo dhalaala warkiisaba daa! Sidii qof waalan oo kale ayay u ekaatey, cid iyo ciirsi toona ma haysato. Jinkii reer Axmar isaga laftiisu waa ka hayaamay. Jidhkeedii wacnaa iyo cajarradeedii asqeyn jirey kolkuu macaan iyo qadhaadhba ka dhammeystay, waa illaawey!!!

Johoraddii Quruxda iyo meeqaamka ku lahayd labadii qasri ee ay kusoo noolaatey, maanta waxa u dambeysay in ay sidaa noqoto. Go'aan iyo ikhtiyaar midna ma leh!! Jin aan la dhalan waxna la wadaagin baa hoggaanka u haya. Haa iyo Maya midna ma awooddo. Sidii dhalaanka ayaa kolba sidii la doono loogu taliyaa!! Dhabankii iyo dheehii ay lahayd muddo ka hor maanta waa ka suulleen. Jaaheedii widhwidhi jirey kolka uu ina ragg isha ku dhufto, maanta dubuur iyo qolof baa dusha ka saaran. Cabaad iyo ciil kuma hadhin. Oohinna waaba ka qalashay, oo waaba kasoo burqan la'dahay. Qalbiga ayaa holcaya, xannuun aan nabad duleed ahayn baa dharaar iyo habeen damqanaya. Qasriga dhexdiisa habeen walba mid wasiir ah, ama tol ah ama jin kalaa usoo biyeysata. Kufsi iyo awoodba waa lagula kacaa. Ma yeedhaan ciirsila' ayay noqotey. Oday iyo yarba waa la isu soo qaawiyaa, deedna laga shaqeystaa. Xurmo iyo sharaf kuma hadhin, xishooodna hadalkiisaba daa!! Marar badan waaba la isu soo tilmaamaa, sidii ganacsiga oo kale. Dumarkii lagu yaqaannay qasriga ee dharaar iyo habeen kala wadhnaa, iyada ayaa bara dhaafisey!! Musiibo nolosheedii mar qur ah dhanka kale u rogtay ayaa ku habsatey.

Tiro maleh inta jeer ee ay damacday in ay baxsato Carraabi, waa se suurtogeli weyday. Hungow mooyee wax kale kalama aysan kulmin. Waxa ay usii laba jibbaartay uun caddaadiskii iyo gaboodfalladii lagu hayey! Carraaba miyay marna maanka gelisey in halkaas ay ku dambeyn doonto? Miyay maalinna ku fikirtey bohoshaas iyo god halaqaas baad ku dhici doontaa? Ma cid baa ka shaxshax badnayn? Ka farxad iyo shacni badnayn? Jidhkeedii xaaddu istaagi jirtey kolka

ay aragto iyo xubnaheedii kala jarjarnaa xaggay tolow ku dambeeyeen? Sidii lafo tawafey, oo maalinba dhurwaa dhinac goosto ayaa uu noqdey!!

Carraaba waxa aroor hore ah garaadkeeda kusoo dhacay fikrad saameyn xooggan nolosheeda ku yeelatey! Tolow maxay ahayd fikraddaasi?! Fikrad maankeeda gilgishey. Daba iyo dacal, kal iyo hoosba. Mar naxdin iyo uur kutaallo weyn ku noqotey. Marna farxad iyo raaxo la noqotey. Waase ku dhici weyday dharaarihii hore oo dhan. Aad ayay uga labbo labbaysay! Marnaba waa u cuntami weydday intii hore fikraddaasi. Ugu dambeyn se waxa ay is tidhi "Calool adeyg waa lama huraan". Carraaba waxa ay goor fiid ah, oo lamid ah fiidkii ay leexada keligeed ku raaxeysanaysay, ee ay joogtay qasrigii aabbaheed Baasaweyne. Ayaa ay daaqadda qolkeedii oo ku yaalla dabaqa seddexaad ee qasriga koonihiisa ay furtey. Si badheedh ah, oo aan ka laalaabasho lahayn ayay isaga soo xoortey!! Waxa ayna ku dhawaaqeysay weedho aad ay ula fajaceen jinkii qasriga joogey oo dhan kana mid ahaayeen: "Xorriyaddu waa farxadda nolosha!" "Adduun jeel ah, waxa dhaama dhimasho aakhiro!" "Dhimashadu waa xorriyadda buuxda, ee kama dambeysta ah!" "Marnababa kuma soo noqon doono cadaabta sidan ah!".

W/Q: Cabdifataax Xasan Maxamed “Barawaani”

Web: www.abdifatahbarawani.wordpress.com

Email: barawaani@yahoo.com

Kaltirsiga: Ogos 02, 2019.